



Minister for Housing

50 Lonsdale Street
GPO Box 4057
Melbourne Victoria 3001
DX210081
www.dhs.vic.gov.au
Telephone: (03) 9096 8586

26da Maajo 2008

Kireystaha Sharafta leh

Xukuumadda Brumby waxay raadineysaa siyaabo badan oo ay ku caawin karto kireystayasha guryaha dadweynaha si ay kor ugu qaaddo tayada nolosha ayagoo ku siinaya qaymo jaban alaabta guryaha iyo u adeegga guud iyo inay bixiyaan dayn jaban si ay u helaan fursad ay ku gataan waxyaalaha ay doonayaan.

Waxaan ku farxsanahay ama ku hanweynahay inaan idiin soo diro warbixin idiin sheegeysa adeegayada faraha badan oo idiin caawinaysa, waxaa ka mid ah Adeegga Gadashada ee Good Shepherd.

Good Shepherd waxay kaa caawin kartaa gadashada alaabata cusub ee caadiga ah ayagoo kula gorgortamaya sicer la dhimay ilaa 20%.

Xaafiska Guri-siinta (Office of Housing) wuxuu maalgelin ku sameynayaa Good Shepherd si ay u fidiyo awoodda gadashada ee kireystayaasha guryaha dadweynaha ayna u siiso fursad ama awood ay ku isticmaalaan adeeggan markay doonaan.

Warbixinta la idiin soo diray waxay idiin sheegeysaa baranmijyada daymaha iyo mashaariicda deeqaha kuwaas ku caawin kara.

Haddii aadan hubin adeegaha kuu fiican ama waxtarka kuu leh, waxaa laga codsanayaa inaad wacdid khadka adeegga meel-u-diridda Gurisiinta oo aad ka helaysid taleefanka (9096 8586 ama 1800 663 662).

Xaafiska Guri-siinta waa sii wadayaa baarista helitaanka alaabta qiimaha dhiman, warbixino kalena waa iidin soo diri doona bilaha soo socda.

Mahadsanidiin

RICHARD WYNNE MP
Wasiirka Gurisiinta

Farriinta Wasiirka

Buuggan-yar wuxuu kuu sheegayaa siyaabo kala duwan oo aad ku heleysid caawimaad markaad doonaysid inaad baddashid ama gadatid qalabka guryah ee cusub, sida firijiyada, qasaaladaha, kuraasta fadhiga ama kombiyuutarrada.

Buuggan-yar waxaa kale oo idiin sheegayaa wax-ka-dhimista la heli karo tababarka iyo koorsooyinka waxbarashada dheeraadka ah oo ay xukuumaddu maalgeliso.

Buuggan-yar ma wada koobayo caawinaad kasta oo la heli karo.

Xukuumadda Brumby waxay sii wadaysaa inay siiso kireysatayasha warbixin ku saabsan, mashariicada wax-ka-dhimista qiimaha jaban iyo adeegyada daymaha.

Baddalidda ama gadashada qalabka guriga ee cusub.

Addeegga Gadashada ee Good Shepherd

Addeegga Gadashada ee Good Shepherd waa adeeg telefoon oo ku bahasan wadanka oo dhan kaaso caawiya dadka dakhliga hoose inay gataan alaabada guryaha ee cusub. Waxaa ka mid ah firijiyada, qasaldaha, fadhiga iyo qalabka daawooyinka.

Xaafiska Guri-siinta waxuu maalgeliyaa Good Shepherd si ay u ballaarisoo adeegga gadashada si ay kireystayasha guryaha dadweynaha oo dhan u awoodaan una helaan adeeggan markay u baahadaan.

Sidee buu u shaqeeyaa?

Adeegyada Gadashada (The Buying Service) wuxuu kala shaqeeyey wax-ka-dhimis shabakadda ganacsatadooda degaanka oo dhan ee dowlad-goboleedka. Taas micnaheeda waa waxaad awood u heleysaa in aad ku heshid wax-ka-dhimis qaymo jaban ilaa boqolkiibalabaatan waxyaalahaas aan soo shegnay.

Shaqaalaha Adeega Gadashada waxay kuu sheegayaan inta sanno u leeyahay waranti iyo in walaxaas uu yahay mid ku dhaqaalo roon oo ku dhaqaalayna korontada ama biyah, si aad lacag u dhaqaalaysatid biilasha gurigaaga.

Kumaa xaq-u-leh?

Dadka haysta kaarka wax-ka-dhimista:

Xiriirka

Addeegga Gadashada ee Good Shepherd
Isniinta ilaa Jumcaha 10:00 am ilaa 3:00 pm
taleefanka 9417 4666

Deeqaha qalabka koroantada ee Home Wise.

Home Wise waa qayb cusub ee Wasaaradda Adeega Insaanka waxay bixisaa barnaamijyo lagu caawiyo dadka dhaqaalah liita oo ay soo foodsaartay dhibaato adag ahna dad u dhashay Victoria si ay u badalaan firijiyada iyo qasaaladaha.

Barnamijkan waxaa markiisii hore loo yaqaanay barnaamijka deeqaha lacageed (capital grants program) waana la balaariyey. Waxaad heli kartaa deeq wax ka badan mar qura ah nolashaada. Waxaad kale oo aad heli kartaa qasaaladda iyo firijiyada oo is wata ama isku mar ah.

Kumaa xaq-u-leh?

Waa inaad haysataa kaarka dadka howlgabka ama kaarka caafimadka.

Waa inaad haysataa qasaalad ama firij duug ah kuwaaso hallaysnaa 12 bilood ee ugu dambeeyey ama howlgabay ama shaqeyneyn.

Waa inaad walaxii duuggaa ahaa ku heysaa gurigaaga.

Waa in aadan helin qalabka guryaha ama lacag deeqda oo la bixiyo ilaa mudo 5 sano ah.
Waa in aad la timaaddaa inaad haysan wax kayd lacageed ah oo aad ku gadan kartid mid cusub.

Haddaad doonaysid inaad ogaatid inaad xaq u leedahay iyo inkale waxaa la xiriirta Wasarada Adeegga Insaanka qaybta (Concessions Unit) ka la xiriir telefoonka 1800 658 521

Gadashada kombiyuutarrada desktop ah ee la dhimay

WorkVentures Connect IT

WorkVentures waa haya'd aan ribax radin kana shaqaysa Australia oo dhan, waxay badalaan kombiyuutarrada iyo qalabka ay isticmaaleen dowlada ama hayadah waaweyn kana dhigaan qalab dib loo isticmaali karo una awood gadasho u heli karo qofka saboolka ah ama dhaqalaha yar.

Tusaale, waxaad awood u leedahay in aad ku gadatid kombiyuutar qimo dhan \$250 lagu daray adeega keenida oo ah \$40.

Maxay bixiyaan?

WorkVentures Connect IT waxay hayaan waxaa ka mid ah in ay dib u hagaajiyaan kombiyuutarka, tusaale Pentium 4 desktop kombiyutar ah oo wata internet dial up modem wata 25 sacaadood oo lacag la'aan ah oo aad ku isticmaali kartid interneentka Microsoft XP Professional 2007, Microsoft Office Standard ama Anti Virus Software Iyo Internet explorer

Sidee bey u shaqaysaa?

La xiriir WorkVentures Connect IT si aad ugu la xaajootid waxyaalaha kala duwan oo ay hayaan.

Siyaabo kala duwan baad u bixin kartaa oo kala ah Money order—lacagta xafiiska boostada laga dalbado, Jeega bangiga, jeegga shakhsiga ah ama Direct deposit ama lacag adiga oo ku shuba akoonkaaga.

WorkVentures waxay leedahay qorshe ganacsi oo aad ku bixin kartid haddii aadan lacagtii oo kaamil ah aadan hayn.,si tartib lagaagaa qaado.

Centrelink waxay leedahay hab horumain oo dayn ku slaysan.

Kumaa xaq-u-leh?

Waa inaad haysataa kaarka daryeelka caafimaadka, kaarka dadka howlgabka, iyo kaarka dadka iinta amanaafada ah, ama waa inaad haysataa dokumanti la xiriiraa dhaqaalaha yar ama tabaalaysan ama dhibaato muujinya.

Xiriirka

Kala xiriir WorkVentures Connect IT taleefanka:
1800 112 205

GreenPc

GreenPc waa urur dib u hagaajiya kombiyutarrada hore ee dowlada iyo hayadaha waaweyn ee wandanka kana dhiga kuwa dib ay isticmaali karaan dadka dhaqaalaha yar.

Tusaale, waxaad awood u heli kartaa inaad ku heshid Pentium 3 desktop kombiyuutar lacag dhan \$99 ama Pentium 4 desktop kombiyuutar lacag dhan \$230. Lagu daray adeegga keenidda oo ah \$45 ilaa 70 mid kasta.

Maxay bixiyaan?

GreenPC waxay hayaan noocyo kala duwan oo kombiyuutarro ah . Waad la hadli kartaa waana waydiin kartaa noocyada kombiyuutarrada ay hayaan waana ka dooran kartaa midka adiga kugu habboon.

Kumaa xaq-u-leh?

Waa inaad haysataa karaka daryeelka caafimadka, kaarka dadka howlgabka, ama waa inaad haysataa dokumanti la xiriiira dhaqaalaha yar muujinya.

Xiriirka

Kala xariir GreenPc taleefanka
1300 306 645 ama
www.greenpc.com.au

Barnamijka Deemaha

Daymaha aan Dulsaarada lahayn *NILS®:

Daymaha aan Dulsaarada lahayn waxay siiyaan dayn aan lahayn dulsaar qof kaligiisa ama qoysaska ah kuwaas dhaqaalahoodu hooseeyo si ay u gataan alaabada guryaha . Waxaa ka mid ah alaabtaas firijiyada, qasaaladaha, telefishanno, sariiro iyo dhar qalajiyaal.

NILS waxaa laga yaaba inay kaa caawin karaan waxyaalaha daruuriga ah sida caafimaadka ama kharajka waxbrashada. NILS looma isticmaali karo caawimaad degdeg ah, lacagta dhigaalka ah ee guryaha la dhigo, lacagta ijaarka, kharjaka nololeedka ama dayn bixinta.

Sidee bey u shaqaysaa?

NILS waa mashruuc ku salaysan bulshada taas oo caawisa dadka si ay u helaan dayn cadaalad, amni ku salaysan si ay u gataan alaabta iyo adeegga ay doonayaan.

Kumaa xaq-u-leh?

NILS waxay haysaa kharaj yar sidaas darteed waa inaad tahay qof leh kaarka daryeelka caafimaadka ama kaarka dadka howlgabka iyo inaad tahay qof si rasmi dhaqaalihisau hooseeyo. Waa inaad ku noolayd cinwaanka gurigaaga in ka badan lix bilood xaaladaha oo dhan.

Imisa ayaan amaahan kara?

Daynta la qaadan karo way noocyo badan tahay , hase ahaatee lacagta la amaahan karo waxay u dhexeesa \$800 ila \$1200. Waqtiga lagu bixin karo waa 12 ilaa 18 bilood.

Xariir:

Si aad u ogaatid haddii uu jiro adeegga NILS Idegaanka aad ku nooshahay waxaa ka eegtaa website-ka ah: www.goodshepvic.org.au/microfinance.

Ama

Haddii aad leedahay qof ku caawiya weydiiso sida u kugu heli lahaa meesha laga helo adeeggan.

Adeegga NILS wuxuu ku xiran yahay iskaa wax u qabso dad ku shaqeeya, marka laga yaaba intooda badan inaysan furnayn shanta malmood ee toddobaadka.

***NILS®** waa astaanta ganacsiga oo diwaangashan ee Adeegga Good Shepherd ee Dhalinyarda iyo Qoysaska.

Stepup (Daymaha Dulsaarka Hoose leh)

Good Shepherd oo la gaadsanayso Bangiga National Australia waxay leedahay Daymaha Dulsaarka Hoose ee shakhsiga ah, waxaa lagu magacabaa stepUP si loogu gato alaabada sida maacuunka ama kuraasta, fadhiga, kombiyuutarada iyo baabuurta duuga ah ama gacan labaad soo martay.

Kuma xaq-u-leh?

Waa in aad leedahay Kaarka Daryeelka Caafimaadka ama waa in aad qaadata Lacagta Canshuurta Qoyska Qaybta A. Waa innadan awoodin inaad adeegsiga adeegyada maaliyadeed, waa inaad ku noolayd cinwaankaaga hadda ah in ka badan ilaa lix bilood.

Immisa ayaan amaahan karaa?

Daymahu waxay u dhaxeeyaan \$800 ilaa \$3,000. Dulsaaradu waa kuwo go'an in teeramkooda lagu jiro. Dib-u-bixinta waa mid isbadbadali karta. Ma jiraan wax ujrado ah ama dulsaaro ah oo la socda dayntan.

Daymaha Step-up waxaa laga heli karaa xafiisyada soo socda. Wixii macluumaad dheeraad ah:

Xiriirka

Good Shepherd oo laga helo	
Melbourne	8412 7317
Western Suburbs	9364 5230
Mornington Peninsula	5979 8199

Daymaha progress-ka

Haya'daha Brotherhood of St Laurence iyo Bangiga ANZ waxay siiyaan dayn dadka dakhligoodu hooseeyo si ay u amaahdaan lacag ay ku gataan alaabta whitegoods iyo waxyaalaha kale sida kombiyuutarada iyo baabuurta.

Kumaa xaq-u-leh?

Waa in aad leedahay Kaarka Daryeelka Caafimaadka ama kaarka dadka howlgabka waa inaad ku noolayd cinwaankaaga hadda ah in ka badan ilaa lix bilood.

Waa inaad awooddaa inaad samayso dib-u-bixinta joogto ah.

Immisa ayaan amaahan karaa?

Daymahu waxay u dhaxeeyaan \$500 ilaa \$3,000.

Dulsaaradu waa kuwo go'an in teeramka daynta lagu jiro.

Hal ujrada oo \$40 ayaa layska doonayaa.

Daymaha waxaa laga heli karaa xafiisyada Brotherhood. Fadlan wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir xafiiskaaga kuugu dhow.

Xiriirka

Brotherhood of St Laurence taleefanka	
Fitzroy	9483 1183
Craigieburn	9305 5100
Frankston	8781 5900

Sidee bay adeegyadan wax u caawin karaan?

Sheekada John ma u e'gtahay mid la wada ogsoon yahay?

Firiijkii John wuu jabay wuxuuna soo amaahday firiijkii baarka ee saaxiibkiis. Wuxuu ogaadey inuusan xaq u lahayn deeqda Home Wise grant, maaddaama uu qaatay mid hore sannadkii hore oo uu u qaatay inuu washing machine.

John wuxuu hubiyey lacagtiisa wuxuuna ogaadey inuu awoodi doono dib-u-bixinta daynta haddii uu qaato dayn.

Muxuu sameeyey?

John wuxuu la hadlay bixiyaha NILS ee degaankiisawuxuuna buuxiyey codsigii daynta.

John markaas ka dib wuxuu aadey shoobinka wuxuuna helay sicirro kala duwan oo ku saabsan firijka. Wuxuu la xiriirey Good Shepherd wuxuuna u sheegay firijka uu doonayo inuu gato.

Maxay samaysay Good Shepherd ?

Shaqaalaha Good Shepherd ayaa hubiyey haddii ay taasi ahayd firij ku fiican John. Waxay heleen firij oo la says iyo qiimo ah kan qiyaasta isticmaalka tamarta ee 5 star-ka ah. taas waxay John ka caawisay inuu dhaqaale u helo biilka korantadiisa. Good Shepherd waxay la hadleen bixiyeyaasha shabakadda waxayna heleen wax-ka-dhimis qiimaha firijka John.

John wuxuu helay ogolaanshaha dayntiisa wuxuuna soo gatay firiijkii.

Sheekada Amy

Amy waxay doonaysey iunay soo gadato baabuurka sakandi handhi (duug) ah si ay u soo booqato hooyadeed toddobaadkiiba, hase ahaatee lacag ku filan maysan haysan oo isla markiiba ku bixiso.

Maxay samaysay?

Amy waxay la xiriirtey barnaamijka daymaha ee stepUP. Waxay ka caawiyeen inay hesho daynta si ay ugu gadato baabuurka, waxayna samaysatay qorshe lacag bixin oo ay maamuli karto.

Bixinta lacagaha tababarka iyo koorsooyinka waxbarashada dheeraadka ah

Wax-ka-dhimista ujrada tababarada iyo koorsooyinka waxbarashada dheeraadka ah oo ay dowladdu maalgeliso

Xukuumadda Victoria waxay maalgelisaa mac-hadyada TAFE-ka iyo bixiyeyaasha tababarka iyo koorsooyinka waxbarashada dheeraadka ah si loo siiyo dadka Victoria oo dakhligoodu hooseeyo wax-ka-dhimista ujradda koorsooyinka badan.

Tan waxay kugu caawin kartaa inaad hesho xirfadaha camaliga ah kuwaas oo kuu horseedi kara shaqaalaynta ama inaad hesho shaqo wacan.

Maxay yihiin faai'dooyinku?

Sannadka 2008, waxaad koorsada xukuumaddu maalgeliso ka dhiibi doontaa qiyaastii ujradda waxbarashada ee \$55 ah muddo 12 bilood ah.

Waxaad kaloo heli doontaa wax-ka-dhimista adeegyada ardayda iyo ujradyada kale. Kuwaas way ku kala duwan yihiin mac-hadyada TAFE-ka iyo koorsooyinka.

Kumaa xaq-u-leh?

You must have a pensioner concession or health care card, or be a dependent spouse or child of a card holder. Veterans gold card holders are also eligible.

Waa in aad leedahay kaarka wax-ka-dhimista dadka howlgabka ama kaarka daryeelka caafimaadka ama waa inaad tahay wadeey ku-tiirsane ah ama ilmaha qofka haysta kaararkaas. Dadka haysta kaarka dahabiga ee soo-halgameyaasha (Veterans gold card) ayaguna way u xaq leeyihiin.

Xiriirka

Wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir mac-hadyada TAFE-ka iyo bixiyeyaasha tababarka iyo koorsooyinka waxbarashada dheeraadka ah.

Haddii aad u malaynayso inay runtii kugu adag tahay inaad lacag u hesho waxbarashada dheeraadka ah iyo tababarka, bixiyeyaasha ayaa awoodi doona inay ku caawiyaan.

Wixii macluumaad dheeraad ah kala hadal bixiyaha degaanka.

Barnaamijka Shaqo-siinta Kireysteyaasha Guryaha Dadweynaha

Barnaamijka Shaqo-siinta Kireysteyaasha Guryaha Dadweynaha (Public Tenant Employment Program (PTEP) waa barnaamij ay leedahay Wasaaradda Adeegga Insaanka (Department of Human Services) si shaqo-helid loogu abuurto kireysteyaasha guryaha dadweynaha.

Ayadoo lala kaashanayo mac-hadyada TAFE-ka iyo haya'daha tababarka oo diiwaangashan, waxaa jira dhowr koorsooyinka mihiyadaha oo la kabo oo ay heli karaan sannadka 2008 dadka ku nool guryaha dadweynaha kuwaas oo leh kaarka daryeelka caafimaadka.

Tusaaleyaalka qaarkood waxaa ka mid ah Shahaadaha 3aad (Certificate 3) oo loo qaato daryeel dadka da'da ah iyo Shahaadaha 4aad (Certificate 4) oo loo qaato taageerada dadka curyaanka ah.

Xiriirka

Wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir Barnaamijka Shaqo-siinta Kireysteyaasha Guryaha Dadweynaha (Public Tenant Employment Program) taleefanka: 9096 1274 ama 03 9096 5774

Lamabarada Waxtarka ah

Adeegga Wax-gadashada ee Good Shepherd (Good Shepherd Buying Service)

9417 4666

NILS

si aad u ogaato bixiyaha degaanka ka eeg:

www.goodshepvic.org.au/microfinance ama la hadal bixiyaha taageeradaada

stepUP- Good Shepherd

Melbourne	8412 7317
Western Suburbs	9364 5230
Mornington Peninsula	5979 8199

Daymaha Progress - Brotherhood of St Laurence

Fitzroy	9483 1183
Craigieburn	9305 5100
Frankston	8781 5900

Deeqaha Qalabka Korantada (Appliance Grants)

Barnaamijka Home Wise program

Department of Human Services, Concessions Unit

1800 658 521

WorkVentures Connect IT

1800 112 205

GreenPC

1300 306 645

Consumer Affairs Victoria

Wixii macluumaad maaliyadeed iyo talooyin ah oo ku saabsan arimaha daymaha iyo amaahda

1300 558 181

Energy and Water Ombudsman

Haddii biilashaadu ay aad u sarreeyaan aadna awoodin inaad la xalliso arinta bixiyahaaga adeegga, waxaad la xiriiri kartaa **Ombudsman**.

1800 500 509

Telecommunications Industry Ombudsman

Haddii biilashaadu ay aad u sarreeyaan aadna awoodin inaad la xalliso arinta bixiyahaaga adeegga, waxaad la xiriiri kartaa **Ombudsman**.

1800 062 058

Maintenance Call Centre

Wixii su'aalo ah oo ku saabsan dayactirka guud

13 11 72

Barnaamijka Shaqo-siinta Kireysteyaasha Guryaha Dadweynaha Public Tenant Employment Program

wixii su'aalo ah oo ku saabsan barnaamijyada Wasaaradda Adeegga Insaanka (Department of Human Services)

9096 1274 or 03 9096 5774

Adeegga LanguageLink ee Xafiiska Guri-siinta (Office of Housing LanguageLink service)

Wixii macluumaad duuban ah oo ku saabsan gurisiinta dadweynaha ama inaad ku xiranto xafiiska degaankaaga ama Maintenance Call Centre

Arabic	9280 0790
Cantonese	9280 0791
Croatian	9280 0792
Polish	9280 0793
Russian	9280 0794
Somali	9280 0795
Spanish	9280 0796
Turkish	9280 0797
Vietnamese	9280 0798
English	9280 0799

Wixii luqadaha kale ah, fadlan weydii Xafiiska Gurisiinta ee degaankaaga si aad turjumaan u diyaarsato.

Waxaa daabacay Xafiiska Gurisiinta ee Xukuumadda Victoria Wasaaradda Adeegga Insaanka (Department of Human Services)

© Copyright State of Victoria 2008

Waxaa ogolaaday Richard Wynne, Wasiirka Gurisiinta
50 Lonsdale Street, Melbourne

Waxaa kaloo laga heli karaa www.housing.vic.gov.au

Maajo 2008